



DAAWADA COVID-19

Daawada afka laga qaato ee ka hortagta fayraska

Daawooyinka COVID-19 ee loogu yeero antivirals waxay ka caawiyaan dadka inay iska caabiyaan jirrooyinka. Paxlovid waxaa loogu talagalay dadka jira 12 sanno iyo ka weyn; molnupiravir waxaa loogu talagalay dadka waaweyn ee jira 18 sanno iyo wixii ka weyn. Labadan daawooy ee kahortagga fayraska waa kaniini afka aad ka qaadan karto.

Haddii aad la jirran tahay COVID-19, daawada ka hortagta fayraska waxay kaa joojin kartaa inaad sii xannuunsato waxayna soo gaabin kartaa muddada aad jirran tahay

Waxa laga yaabaa in aad daawadan hesho haddii saddexdan shay run yihiin:

- ✓ Astaamahaagu bilowdeen wax yar 5 maalmood kahor.
- ✓ Haddii aad halis ugu jirto COVID-19 daran iyadoo ugu wacan tahay inaad da' weyn tahay ama aad qabto xaalad caafimaad sida sonkorowga, cudurrada wadnaha, ama cudurrada sambabka.
- ✓ Haddii aan isbitaal lagu dhigin sabab la xiriiro COVID-19.

Daawooyinka COVID-19 waxa lagu heli karaa bilaash ama qiimo jaban. Barnaamijyada kaalmada bukaanka ayaa diyaar u ah in lagaa daboolo kharashaadka, oo ay ku jiraan dadka aan lahayn caymis caafimaad. Weydii adeegaha caafimaadka ama farmashiistaha haddii aad buuxisay shuruudaha ku xiran barnaamijka kaalmada bukaanka.

Booqo [lkhtiyaarada Daaweynta COVID-19 \(www.health.mn.gov/diseases/coronavirus/meds.html\)](http://www.health.mn.gov/diseases/coronavirus/meds.html) haddaad doonaysid macluumaad dheeri ah, ama la hadal dhakhtarkaaga ama daryeel-bixiye caafimaad oo kale si aad u ogaato inaad isticmaali karto daawadan iyo si aad u hesho rug caafimaad.

U sheeg daryeel-bixiyahaaga caafimaad haddii:

- Aad uur leedahay ama qoyshaynayso inaad uur qaado
- Aad naasnuujinayso
- Aad qaadanayso daawooyin ama nafaqooyin kaabis ah
- Aad qabto wax xasaasiyado ah
- Aad qabto xanuuno halis ah

Haddaad doonaysid macluumaad dheeri ah, waxaad wici kartaa Khadka Taleefanka Dadweynaha ee COVID-19 833-431-2053, laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 7 galabnimo. Isniinta ilaa Jimcaha, ama laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo. Sabtiyada.